# Qaabka loo buuxinaayo foomka lagu dalbado sawirada iskuulka

Iskuullada dalkan Finland waxaa sannad walba laga qabanqaabiyaa sawirrada ay ardeydu ku galaan iskuulka. Sawirradaas waxaa ardeyda qofkii doonaaya laga qaadaa, sawir qaarka sare ah iyo sawir kooxeed laga qaadaayo fasalka oo dhan.

Dhammaan ardeyda ka qayb gashay sawirradaas la qaaday, waa in ay foomkaan dib u soo celiyaan, iyadoo la soo buuxiyay. Waxaa waalidka laga doonayaa in ay soo saxiixaan foomkaan. Haddii ardeyga ay da’diisu tahay 18 sano iyo wixii ka weyn, isaga ayaa foomka soo buuxinaaya, soona saxiixaya. Foomka waxaa loo dhiibayaa sawir qaadaha.

Sawir qaadista kadib, waxaa sawirradii oo diyaar ah si toos ah loogu soo diri doonaa guriga ardeyga. Dalabka sawirrada waxbaad ka bedeli kartaa, adigoo isticmaalaya dhanka internetka: waxaa halkaas ku jira qaabab kala duwan oo aad ku kala xulan karto hadba nooca sawirka aad dooneyso. Sidoo kale haddii aadan dooneyn in adiga wax sawir ah laguu soo diro, waxaad goobta dalabka ka saari kartaa dhammaan noocyada kala duwan ee sawirrada. Dhammaan sawirada guriga laguugu soo diray waxaad ku soo celin kartaa si lacag la’aan ah muddo laba todobaad gudahoood ah. Waxaad naga heleysaa iimeyl ogeysiin ah, kaasoo laguugu sheegaayo marka dalabka la soo geliyo internetka, si aad u kala doorato hadba nooca aad adigu dooneyso. Marka aad farriintaas naga hesho kadib, waxaad heysataa muddo todobaad ah, oo aad ku kala dooran karto hadba nooca sawirka aad dooneyso.

# Sidaan soo socota ayaad u buuxineysaa foomka dalabka

God walbaa waxaad ku qortaa hal xaraf, lambar ama waxii kale oo calaamad ah, si ay u fududaato akhriska qoraalkaas.

**1. Warbixinta  qofka la sawiraayo**

a) Magaca hore iyo kan qoyska ee ardeyga ka qeybqaadanaaya sawirka
b) Lambarka fasalka ee ardeyga ka qeybqaadanaaya sawirka (tusaale ahaan 1A, 5B, 9C)

**2. Warbixinta qofka dalabka sameeynaaya**

Qofka dalabka sameynaaya wuxuu noqon karaa ardeyga isagu ka weyn da’da 18ka sano ee qaangaarka ah ama qofka ka mas’uulka ah ardeyga da’diisu ka hooseeyso 18 sano.

a) Magaca hore iyo kan qoyska ee qofka dalabka sameynaaya
b) Cinwaanka qofka dalabka sameynaaya: magaca wadada,lambarkeeda, lambarka daarta uu degan yahay (tusaaale ahaan Vasaratie 2 A)
c) Lambarka boostada iyo goobta: degmada ama gobolka, aad ku nooshahay (tusaale ahaan 65350 Vaasa)
d) Lambarka telefoonka qofka dalabka sameynaaya (waxaa aad u fiicnaan laheyd in uu yahay telefoonka gacanta, tusaale ahaan 040 123 4567)
e) Iimeylka qofka dalabka sameynaaya. Tan waa warbixin muhiim ah, waayo warbixinaha la xiriira dalabka sawirada waxaa lagu soo dirayaa iimeylka. Iimeylkaas waa aqoonsigii aad ku geli lahayd adeegga internetka.
f) Saxiixa.

**3. Dalabka iyo qiimaha**

Waxaa halkaan laguugu soo bandhigayaa sawirada kala duwan ee ku saabsan dalabkaaga iyo qiimahoodaba. Waxaad dalabkaas sawirrada ku saari kartaa oo kaliya, adigoo adeegsanaaya dhanka internetka, inta lagu guda jiro mudada laguu qabtay in aad ku kala xulato dalbkaaga.

**4. Sawirro dheeraad ah**

Haddii aad u baahan tahay sawirro ka badan kuwa qiimahooda la sheegay, waxaa qeybta loogu talagalay dalabka dheeraadka ah (lisätuotteita) aad ku qori kartaa tirada aad uga baahan tahay sawir kasta. Haddii aadan u baahneyn sawirro dheeraad ah, waxba ha ku qorin godka afar geeska ah.

**5. Sawir saaxiibeedka**

Sawirrada qaarka sare ah ama kan koox ahaanta lagu galo, waxaa kaloo sii dheer in maalnkaas sawirrada la qaadaayo aad la geli karto saaxiibkaa ama walaalahaa. Foomamku waxaa ay iskudarka guud qaadi karaan warbixinta saddex

sawir oo kuwa saaxiibka ah. Waxaa sidoo kale ku buuxin kartaa oo kaliya, warbixinta hal ama laba sawir oo kuwa saaxiibka ah. Haddii aadan dooneynin sawirka saaxiibka, qeybtan loogu tala galay waxba ha ku qorin.

a) Ku qor halkaan magaca hore ee saaxiibada sawirka isla galaaya. Halkii sawir ee la wada galaayo, waxaa uu deeqaa ugu badnaan lix qofood.
b) Mar kale qor magaca ardeyga la sawiraayo. Magaca waa in mar labaad la qoraa, waayo sawir qaaduhu wuxuu fujisanayaa qeybta hoose ee foomka.
c) Waxaad calaamadda isku tallaabta ah saartaa, ma waxaad dooneysaa sawir saaxiibeedka cabirkiisu caadiga yahay mise midka weyn.

Seppälän Koulukuvat

# Koulukuvien tilauslomake

Kuvaajamme saapuu

Kaikkien koulukuvaukseen osallistuvien on täytettävä tämä lomake ja palautettava se kuvaajalle viimeistään kuvauspäivänä. Täytä lomake tikkukirjaimin. Muista alleki

## Kuvattavan tiedot 1.

1a Etu- ja sukunimi

1b Luokka

## Tilaajan (18 v. täyttänyt) tiedot 2.

2a Etu- ja sukunimi

2b Lähiosoite

2c Postinumero ja -toimipaikka

2d Puhelin

*Nettikauppatunnukset lähetetään annettuun sähköpostiosoitteeseen noin viikon kuluttua kuvauksesta.

2e Sähköposti*

2f **Allekirjoitus**

*Tiedot tallennetaan Seppälän Koulukuvat Oy:n asiakasrekisteriin kuvien toimittamista varten. Lisätietoja rekisteriselosteesta: www.seppalankoulukuvat.fi*

## Tilaus ja hinnasto

**Jotta tilaaminen olisi mahdollisimman helppoa, koulukuvatilauksen lähtökohtana on toimiva ja suosittu perussarja:**

3.



Jos et tee tilaukseen muutoksia nettikaupassa, saat kotiin nähtäväksesi perussarjan. Kaikilla tuotteilla on 14 päivän palautusoikeus. **Tarkemmat ohjeet lomakkeen kääntöpuolella.** »

## Lisätuotteet 4.



Avaim… ___ kpl



Muki* ___ kpl



Pöytätaulu* ___ kpl



Sisustustyynyliina* ___ kpl

…tyjen tuotteiden toimituskulut 3,90–6,90 €/tilaus

## Kaverikuvat 5.

**1.** Täytä alle kaverikuvien os… …jat. **2.** Valitse rastittamalla, haluatko kaverikuvista normaalikokoiset (13 x 19,5) vai isot (20 x 25) kuvat.

5c

13 x 19,5 Kaverikuva

20 x 25 Iso kaverikuva

| **Kuva 1.** | **Kuva 2.** | **Kuva 3.** |
|---|---|---|
| Kavereiden/sisarusten etunimet | Kavereiden/sisarusten etunimet | Kavereiden/sisarusten etunimet |
| 5a | 5a | 5a |

Yhteen kaverikuvaan mahtuu enintään kuusi (6) henkilöä.

Oma nimi 5b

UUSI